

S U M M A R Y

Arrimaha ka dambeeya natiijada Soomaalida cayrta qaadata

Qoraallo gobolka Minnesota u qoran ayaa waxay caddeynayaan in Mareykanka Hindiga, Mareykanka madow, dadka Maanga ah, iyo Soomaalida intii ka qeybqaadatay barnaamijka cayrta Minnesota MFIP inaysan sida dadka kale shaqo u helin ama aysan cayrta ka tegin laba ilaa saddex sano. Tusaale: haddii la eego dadkii qaadanayey caawimaadda MFIP Jannaayo 1998, laba sano ka dib bishii shanaad ee 2000, weli jinsiyadaha soo socda ayaa cayrta qaadanayey:

- Boqolkiiba 35 dadka caddaanka ah
- Boqolkiiba 61% dadka reer Aasiya ah
- Boqolkiiba 55% Mareekanka Hindiga ah
- Boqolkiiba 53% dadka madow (Mareekanka Madow iyo Afrikaanka qaxootiga ah)

Sida kuu cad waxaa jira farqi weyn laakiin lambarrada oo qura nooma sheegi karaan sababta ama sida lagu hagaajin karo si nidaamka cayrtu wax ugu qabto dadka dhibban ee doonaya inay isku filnaadaan. Haddaba si arrintaas loogu kuurgalo ayaa Xarunta Cilmi-baarista ee Wilder waxay guggii ilaa xagaagii 2002 la hadashay 40 kooxood oo ka mid ah dad cayrta hadda qaata iyo kuwii kol hore qaadan jiray. Wadahadalka oo ay hoggaanka u hayeen khuburo ka soo jeedda dhaqanka dadkaas, ayey kooxuhu ka hadleen waxa ay ka tabanayaan xagga cayrta ama xagga shaqada.

Dad badan oo cayrta qaadan jirey oo ka soo jeeda dhaqammo kala duwan oo kooxahaas ka mid ah ayaa gaaray heer ay isku filnaadaan. Hase ahaatee dhammaantood waxay sheegeen arrimo badan oo ka hortaagnaa inay iskood shaqo ku helaan ama shaqo ku sii wataan si ay cayrta uga maarmaan. Arrintaas waxaa wehliya oo ay dadku ka hadleen dhibaatooyin ay ka mid yihiin midab-takoorka, sida kaalmada carruurta lagu helo, hooyga, iyo si gaadiid lagu helo.

Fikradda guud ee uu dadku MFIP ka haysto

Badi kooxaha laga hadlayo ee cayrta qaata waxay oggolaadeen arrinta aasaaska u ah cayrtu inay tahay heshiis ka socda laba-dhinac, inay MFIP siiso caawimaadda ay u baahan yihiin si ay isku filnaansho u gaaraan, iyo inay raacaan sharciga cayrta iyo hawlaha ay ku noqon karaan kuwa iyagu ismasruufa. Haddaba dad badan ayaa qaba hawsha ay MFIP qabato inay sharaf-dhac ama cadaawad tahay laakiin aysan caawimaad ahayn. Qaar waxay dareensan yihiin inuu nidaamka cayrtu si ulakac ah u qariyo sharciga iyo waxqabadka iyo inuu nidaamku ku saleysan yahay niyadjab iyo ku tiirsanaan. Xiriir wanaag leh oo ay dadkaasu la yeeshaan la taliyeyaasha shaqada ee MFIP ayaa wuxuu muhiim u yahay afkaarta ay dadku ka qabaan MFIP iyo sidii ay ugu guuleysan lahaayeen waxyaabaha ay dadku ku rajo weyn yihiin.

Shuruudaha shaqada ee MFIP

Badi kooxaha laga hadlayo shaqo ayey rajeeyaan ama doonaan. Haddaba qaar ayey raadintii badnayd waxay ka niyadjabisay inay shaqo dambe raadsadaan iyo inay shaqadii hore sii wataan. Dadku waxay tixgaliyaan inay shaqadu fiican tahay, laakiin haddana waxay yiraahdaan MFIP ayaa ku khasban inay wax uraajiciso dadka waaweyn, dadka curyaanka ah, dadka daryeela qoyskooda kuwa jirran ama kuwa curyaanka ah. Dadkaasu qaarkood ma ay laha khibrad shaqo, aqoonis afka Ingiriiska ah, ama waxbarsho aasaasiga ah sida wax akhriska ama wax qoridda, amaba waxaa ay qabi karaan dhibaatooyin shakhsiyeed sida jirro maskax ama fahmad darro. Intaa waxaa sii dheer arrimaha shaqooyin badan oo uu midab-takoorku ku saleysan yahay diin, luqad, tirada qoyska, haddii aad cayr qaadata iyo jinsi.

Caawimaadda MFIP ee aad shaqo ku heli karto ama shaqo hore ku sii wadan karto

Dadka laga hadlayo waxay soo gudbiyaan baahi weyn oo ka caawin karta inay shaqo helaan ama inay shaqadii hore sii wataan. Baahidaas waxaa ka mid ah in laga caawiyo xagga gaadiidka iyo daryeelka carruurta, lacag tababar, lataliye xag shaqo oo ku caawiya shaqo raadin iyo shaqo sii wadid. Kolka ay helaan mucaawinadaas badi waxay dareemaan in la caawiyey. Haddaba qaar badan waxa ay soo gudbiyeen inay u baahan yihiin mucaawino ka badan intii ay MFIP siin jirtay.

Faa'iidada shaqada

Dadka laga hadlayo abaal bay u hayaan MFIP inay ku caawisay noloshooda kolkii ay iyagu naftooda isbixin waayeen. Waxay garteen fikradda MFIP inay tahay in shaqadu aad uga aayo wacan tahay cayrta. Dadkoo idil inay shaqeeyaan ayey ka doorbidaan ineysay shaqeyn, khaasatan taasi macnaheedu wuxuu noqonayaa in laga xoroobo baahidii loo qabay MFIP, sida kale qofka waxaa u korodhaysa dareemidda sharaftiisa iyo waxa uu u qalmo.

Dhanka kale dad badan ayaa aad uga cawday kolka ay shaqo bilaabaan MFIP inay si dhakhso leh iyo si lama filaan ah uga goyso wixii ay helayeen. Waxay sheegaan in wixii ka go'a iyo wixii soo gala ay isku mid noqdaan, gaar ahaan kolka lagu isku daro khaarashka shaqada cusub (sida kharashka gaadiidka iyo kan caymiska caafimaadka) waxa ay waayeen ee aan lacagta cad ahayn, taasna waxaa ku jira caawimaddii kharashka daryeelka carruurta iyo tan kirada.

Maxaa la sameeyaa si dad badan loogu caawiyo inay guuleysadaan?

Sida dadkaas shaqada ugu diyaarsan yahay

Cilmi-baarista waxay nagu biirisay in qofka u adeega dadka cayrta qaata loo yareeyo dadka uu qaabilsan yahay, taasi waxay lataliyaha shaqada u suuroggelineysaa in dhakhso loo ogaado dadka caawimaad badan u baahan iyo in hawshooda la bilaabo. Waxaa kale oo ay taasi dhiirrineysaa isbarasho iyo kalsooni dabadeed in dadku shaaca ka qaado in laga daayo in muddo la raadiyo shaqo macnadarro ah. Waxaa taas sii dheer baahida qaxootigu u qabo

turjumaad ay ku fahmaan qaynuunka iyo waxtarka xafiiska cayrta bixiyo. Dadka Ingiriiska ku hadla ayaa xitaa u baahan kara in laga caawiyo u akhrinta iyo fahmidda qaynuunka iyo waraaqaha go'aanka.

Sida suuqa shaqadu diyaarka ugu yahay dadka cayrta qaata

Dadka cayrta qaata waxaa lagu caawin karaa inay shaqo helaan haddii lataliyaha shaqadu dadka shaqada bixiya kala hadlo arrimaha midab-takoorka iyo kuwa luqadda ee goobta shaqada. Sidoo kale suuqa shaqadu dadka cayrta qaata ee aan shaqada garaneyn oo dhan shaqo uma heli karo. Dadkaasu intii ay ku jiri lahaayeen shaqaraadin aysan waxba ku helayn, xukuumadda ayaa ka deyn karta shuruudaha shaqada, ama dibuhabayn ku sameyn karta shuruudaha shaqada si loogu oggolaado tacliin dheeraad ah iyo waxyaabo kale oo shaqada u suuraggelin kara, amaba waxay xukuumaddu horumarin kartaa in si aad ah loo maal geliyo shaqooyinka uu qofka shaqaalaha ah la joogo qof ku caawiya inuu shaqadiisa qabto.

Sida dadku ku helo taageero shaqada ku caawiya

Nidaamka cayrta wuxuu taageeri karaa in dadka cayrta qaata ay shaqo helaan haddii nidaamku daraaseeyo baahida jirta iyo inay ogaadaan farqiga halka uusan taageeruhu ku filnayn. Warbixinta khuseysa taageeraha wacan ayaa dadka lagala hadli karaa, taasna waxay dhalineysa in dadka la ogeysiyo in nidaamkan uusan ka qarin waxa uu dadku heli karo, iyo xitaa in lagu caawiyo in dadku fahmo xadka miisaaniyadda cayrta iyo in cayrta intii karaankeeda ah ay wax ku bixiso.

Caawimadda lataliyaha shaqada waxaa la kordhin karaa kolka loo yareeyo dadka uu qaabilsan yahay iyo in si wacan loogu diyaariyo dhibka ay hawshu wadato. Daraasayn ayaa sheegeysa baahi tababar noocyo badan sida isfahamka dhaqammada kala duwan, la hadalka dadka aan Ingiriis fiican ku hadlin, iyo la shaqeynta dadka cayrta qaata ee uu cadaawad ama shaki horay ugu jirey.

Faa'iidada shaqada

Cilmi-baarista ayaa ina tuseysa isuggeynta shaqada iyo cayrta ineysan sida laga filayey faa'iido u keeneyn. Shaqadu kharash hor leh ayey qoyska gelisaa, kharashkaasna MFIP si wacan uguma ay hadlin. Waxaa muhiim noqon karta in la baaro kharashka dhabta ah ee shaqada ka yimaada taasoo ay ku jirto lacagta guriga, gaadiidka, daryeelka carruurta, iyo tan caafimaadka.

Shaqo bilow ah ku gaar iskufilnaansho

Dadka cayrta qaata shaqooyinka aan xirfadda ahayn aakhirka kuma gaaraan iskufilnaansho. Wakhti shan sano ah macquul ma aha in shaqaale aan xirfad lahayn uu ku gaaro inuu naftiisa dabbaro. Haddaba daraasaddan ayaa soo jeedisay inaysan dadkaasu heli karin wax horumarin fursad shaqada ah. Waxa macquul ah in dadku aqballo kana faa'iidi karo qeynuun cusub oo u oggolaan kara inay shaqaalaha cusub ee lacagta yar helaan tababar horumarin ah.

Sida loo fahmo ujeeddada cayrta

Qasadka ugu horreeya ee lataliyaha shaqadu waa inuu dadka cayrta qaata u jiheeyo shaqo, tan labaad waa in lagu dhaqmo shuruucda qawaaniinta cayrta. Kolka lataliyaha shaqadu xoogga saaro shuruucda cayrta halka uu ku caawin lahaa taageero xagga shaqada ah, ayaa waxa ay keentay inay dadka cayrta qaata qaarkood u qaataan inuu nidaamku kala dirirayo inay isku filnaadaan, khaasatan marka aysan dadku fahmin shuruucda iyo waxqabadka ay heli karaan.

Si loogu guuleysto qeynuunka cayrta iyo hawsha ay qabato waxaa muhim ah in la baddelo fikradaha khaldan. Waxaa xalku noqon karaa shaqaalaha MFIP oo laga dhigo kuwa kala duwan, in si wacan loo tababbaro shaqaalaha MFIP, hawsha dadka ay qaabilsan yihiin oo loo kala yareeyo, iyo masuuliyadda oo loo dheellitiro dadka cayrta u shaqeeya iyo xitaa dadka cayrta qaata.

Gabaggabo

Natiijooyinka daraasaddan waxay noo muujinayaan fursadda ugu wacan ee horumarin guul leh u keeni karta dadka cayrta qaata ee isugu jira Mareykanka Hindiga, Mareykanka madow, Maangiga, iyo Soomaalida, intaba in la siiyo taageero xooggan oo ku saleysan qof qof. Waxaa arrintaas lagu bilaabayaa lataliyeyaal shaqo oo si wacan loo diyaariyey oo dadka ay qaabilsan yihiin loo yareeyo si ay ugu suuraggasho inay fahmaan xaaladda qofka iyo waxa uu u baahan karo ee uu shaqo ugu diyaargarooobi karo. Weliba taasi waxay lataliyayaasha shaqada u keeneysaa inay helaan siyaabo kale oo ku habboon sida ay hawshooda ku fulin karaan.

Waxa aannu ka ogaannay kooxaha munaaqashada Soomaalida

Mawduucyada ay afartaa dhaqan ka siman yihiin waxaa dheer inaan u dhugyeelannay fikrado aan ka helnay 42 Soomaali ah oo ka qeybqaatay sagaal kooxood oo cilmi-baaris lagu sameeyey oo si gooni ah loogula kulmay Minneapolis, Saint Paul, iyo Rochester:

Kooxahaas waxaa ay ayideen oo si guud ahaan ah isugu raaceen inay shaqayn karaan haddii ay filayaan arrimaha soo socda:

- Inay dabooli karaan baahida masruufka qoyskooda
- Inay naftoodu helaan sharaf iyo qiimayn
- Inay wax ku kordhiyaan shacabka iyo bulshada

MFIP waxay bixisaa wax lagu noolaado laakiinse aan horumar lagu gaarin:

- Kooxaha qaar badan waxay u baahan yihiin in la kordhiyo aqoontooda Ingiriiska iyo mid waxbarasho oo lagu citiraafo si ay u helaan shaqo lacag fiican.
- Waalidka uu qoyskiisu weyn yahay shaqo mushaar yar kuma filnaan karto.
- Dad badan ayaa jecel inay ganacsi bilaabaan, laakiin MFIP arrinta noocaas ah kuma caawiso.

Qaar badan oo kooxda ah midab-takoorka ayey arkeen

- Soomaalidu waxay sheegeen in shaqa-helidda iyo xitaa goobaha shaqadaba uu ka jiro midab-takoor diineed oo cad.
- Luuqad la'aan ayaan u suuraggelineyn inay xuquuqdooda ilaashadaan.
- Rochester meelo badan oo shaqo bixiya ayaa u muuqda inay si fiican ula macaamilaan dhaqammada iyo diimaha kala duwan.

Luuqad la'aan ayaa Soomaalida cayrta qaadata u suuraggelin karin inay akhriyaan foomamka iyo waraaqaha MFIP, taasina waxay keeneysaa:

- Inaysan imaan kolka kulan lala yeesho.
- Inaysan fahmin shuruucda iyo shuruudaha.
- Inaysan garan karin caawimaadda iyo waxqabadka ay heli karaan.

Dhibaataada kale ee luuqadeed ee kooxaha Soomaalida waxaa ka mid ah:

- Inay ku wareereen isticmaalka taleefanka fariinta ee shaqaalaha cayrta.
- Inaysan akhrin karin ama qori karin Soomaaliga (iyo xitaa Ingiriiska).

Kooxdaas dhibkeeda daryeelka carruurta waxaa ka mid ah:

- Qoyska oo weyn iyo baahi luuqadeed oo xannaano wacan ka hortaagan.
- Waalidka oo carruurtooda ku dhiirriya dhaqankooda iyo qiimahooda.

Kooxdaas dhibkeeda gaadiidka waxaa ka mid ah:

- Luqad la'aanta oo ku adkeysa inay baska raacaan.
- Qaar badan oo kooxda ka mid ah waxay u baahan yihiin in lagu caawiyo inay helaan leysanka gaari-wadidda.

Baaritaankaan waxaa maalgelisay waaxda adeegyada bulshada ee dowlada maraykanka. Natiijada warbixintaan waxaa soo saaray Wilder Research Center, mana aha mid ka wakiil ah fikradaha iyo siyaasada ay dowladu leedahay.

WILDER RESEARCH CENTER

1295 Bandana Boulevard North, Suite 210
Saint Paul, Minnesota 55108

651-647-4600; FAX 651-647-4623
www.wilder.org/research



War gelin dheeraad ah oo ku saabsan natiijada baaristaan oo kooban ama nuqul (copy) buuxa kala soo xiriir Wilder Research Center. Koobiyaal dheeraad ah waxaad ka heli kartaa shabakad internetka www.wilder.org/research ama soo wac 651-647-4600.

Author: Ellen Shelton
APRIL 2003